


Maalintii aan ka tagay guriga aaday



✎ Lesley Koyi, Ursula Nafula
✎ Brian Wambi
✎ Abdi Muse
3
Soomaali



Global Storybooks

globalstorybooks.net


Maalintii aan ka tagay guriga een magalada aaday

✎ Lesley Koyi, Ursula Nafula
✎ Brian Wambi
✎ Abdi Muse




This work is licensed under a Creative Commons
[Attribution 4.0 International License](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0).
<https://creativecommons.org/licenses/by/4.0>





Boosteejada yar ee tuuladeyna waxa ay aheyd mid mashquulsan dadka awgeed iyo bases la rar dhaafiyay. Dhulka xitaa waxaa yaalay wax badan oo in la raro aheyd. Kirishbooyada ayaa ku dhawaaqayay magacyada meelaha ay basaskooda u socdaan.



“Magaalada, Magaalada, Waxuu u
socdaa Galbeedka!” Ayaan maqalay
kirishbooy ku dhawaqaya. Kaasi
ayaa ahaa baskii aan u baahnaa in
aan raaco.




Baska magaalada ku dhawaad wuu buuxay, laakiin dad badan ayaa wali isku soo riixaayay in ay in koraan. Qaar baa xamuuulkoodi baska hoostiisa gashaday. Qaar kalena waxay dhigteen mesha kabaha lasaaranayay.




Baski soo noqonayay ayaa si dhakhso ah u buuxsamaayay. Dkakhso waxuu ku laaban doonaa bariga. Hada waxa iigu muhiimsan waxay ahayd inaan bilaabo raadinta guriga adeerkay.

Rakaabka cusub ayaa ruxaayay
 tikidhadooda markay raadinaayeen
 meel ay ka fariistaan baska dadku
 ku badan yihiin. Dumarka haysta
 caruurta yaryar waxay ku raaxaysan
 hayeen safar ka dheer.



Sagaal saacadood kaddib, waxaan
 ku toosay buuq weyn iyo wicitan ka
 rakaabkii ku noqonaayay
 tuuladayda. Waxaan soo qaatay
 bacdaydi yarayd waana ka boodey
 baskii.







Waxaan is ku nabay xaga xigto daaqada. Qofka fadhiyay agtayda waxuu si adag u hayay bac cagaaran. Wuxuu soo xidhay kabo duug ah, jaakad dildilaacsan, wuxuuna u muuqday mid aad u xanaaqsan.



Markan jidka sii soconay waxaan sii xifdiyay magaca meesha uu adeerkey kaga noolaa magaalada weyn. Waxaan wali si hoose u sii shekeysan hayay markii aan hurday.



Waxaan fiiriyey banaanka baska oo
waxaan ogaaday inaan ka tagayo
tuuladayda, meeshii aan ku koray.
Waxaan u socday magaalada weyn.



Laakiin maskaxdayda ayaa dib ugu
laabatay guriga. Hooyaday miyay
amaan ahan doontaa? Miyuu
bakaylahaygu ii gali doona wax
lacag ah? Walaalkay miyuu
xusuusan doonaa in uu geedahaygi
waraabiyo?




Raritaankii ayaa la dhameeyey, rakaabkii oo dhanne waa la fadhiisiiyay. Wareejiya yaashii wali waxay is ku soo riixahayeen baska si ay oga iibiyaan alaabadooda rakaabka. Qof kasta wuxuu ku qaylinayay magacyada waxa loo diyaariyey iibka. Ereyada ayaa iila muuqday kuwo cajiib ah.





Intii safarka sii gudo galnay, gudaha baska ayaa aad u kululaaday. Waxaan is ku xidhay indhaha anigoo rajeynayo in aan seexdo.

Rakaab yar ayyaa iibsaday cabitaan,
 qaar kalena waxay iibsadeen cunto
 fudud oo yar yar waxayna bilaabeen
 inay calaliyaan. Kuwa aan haysan
 lacag, sida aniga oo kale, way
 daawanaayeen.




Sidaas tuu baska uga dhagaqay
 boostejada baska, waxaan
 daaqada ka eegay bananka. Waxaan
 si la yaab leh uga fikiray in aan abid
 kuso laaban doonto tuulada.





Hawlahani waxaa kala gooyay baska hoonkisa, calaamad muujinayso in aan diyaar u nahay inaan baxno. Rakaabiyihii wuxuu ku qayliyay wareejiya yaashii si ay baska uga dagaan.



Wareejiya yaashii ayaa isku riixay si ay uga dagaan baska. Qaarkood waxay sii yeen baaqigoda rakaabkii. Kuwa kale waxay sameeyeen daqiiqadkii ugu dambeeyey ee iibinta alaabooyin badan.